

## Xaq-u-yeelashada Ka-tanaasulidda

Qaatayaasha waa in ay ka soo baxaan shuruudahan soo socda:

- In uu noqdo macmiil u qalma Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) sida ku cad xeerka RCW 71A.10.020(5).
- In uu leeyahay naafonimo sida waafaqsan shuruudaha lagu qoray Xeerka Dammaanada Bulshada.
- In uu codsado daryeelka adeegyada muddada-dheer ah/ Medicaid oo uuna xaqijiyo dakhli aan dhaafin 300% ee ah heerka dheefta federaalka ee caadiga ah ee SSI.
  - Haddii uu ilmo yahay, dakhliga iyo kheyraadyada waalidka lama tixgeliyo.
  - Haddii uu yahay qof weyn oo la nool xas/nin, dakhliga iyo kheyraadyada xaaska/ninka lama tixgeliyo.
- In uu haysto kheyraad dhagaale oo ka yar \$2,000 ama waa in uu ku jiraa barnaamijka Apple Health ee loogu talagalay Shaqaalaha Naafada ah.
- Qorshaha adeegga qofka-xuddunta u yahay ayaa wuxuu muujinayaa sida baahiyada caafimaadka qofka, bedqabka, iyo baxnaaninta loogu buixin karo gudaha bulshada ee ah adeegga ka-tanaasulidda bilaha ah iyo/ama korjoogteynta bilaha ah.
- In uu oggolaado aqbalidda adeegyada ku salaysan-bulshada iyo guriga bedelkii uu oggolaan lahaa ICF/IID.
- Loogu talagalay CIIBS oo keliya, qaatayaasha waa in sidoo kale:
  - Ay jiraan da'da 8 illaa 17 ee loogu talagalay isqoridda hore (loo adeego ilaa da'da 20);
  - Bilowga hore laga qiimeeyo khatar sarreysa ama daran oo ah meelayn guriga dibaddiisa ah oo sabab u ah hab-dhaqanno adag; iyo
  - Ay la nool yihiin qoys oggolaanaya in uu ka qaybgalo barnaamijka CIIBS.
- Loogu talagalay IFS oo keliya, qaatayaasha waa in sidoo kale:
  - Ay ku nool yihiin guriga qoyska.
- Loogu talagalay kaliya llaalinta Bulshada, dadka qaata sidoo kale waxaa khasab ku ah in ay:
  - In ay da'doodu ahaato 18 sanno ama ka weyn; iyo
  - Kasoo baxdid shuruuda u qalmitaanka ku qoran WAC 388-831-0030

## Helidda Ka-tanaasulidda


Codsi isqorid ah, ama loogu bedelanayo ka-tanaasulid bedel ah ayaa la samayn karaa wakhti kasta. Weyddii maareeyaha kheyraadka kiiska. Haddii aan qofku hayasan Maamulaha Kheyraadka Kiiska (CRM), ku dhaaf fariin khadka Adeegga Lacag-La'aanta ah ee lagu qoray hoosta Xafisiyada Gobolka ama ugu soo dir codsiga si toos-ah internetka cinwaankan [www.dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request](http://www.dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request).

Ka soo biixidda shuruudaha adeegga ee loogu talagalay ka-tanaasulidda ma dammaanad qaadayso helidda adeegyada ka-tanaasulidda. Ka-tanaasulid kasta waa mid ku xadian tirada dadka loo adeegi karo. Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) wuxuu haystaa awood uu ku xadido isqorida la isku qoro ka-tanaasulidda ku salaysan helidda maal-gelin loogu talagalay ka-qaybgalayaasha ka-tanaasulidda ee cusub.

## Xuquuqaha Dhageysiga Maamulka La Xiriira

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo dhageysiga maamul la xiriira oo leh go'aamadan soo socda iyada oo aan la eegayn barnaamijka ama adeegga:

- U qalmida Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) la diiday, la joojiyey ama Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) uu sameeyo facil dib u dhigid aan macqul ahayn oo kusaabsan codsigaaga; ama
- Nooca ama tirada adeegga laguu oggolaaday in aad heshid; ama
- Diidis, dib u dhimis, ama joojinta adeegaha; ama
- Diidis doorashada adeega ah ee uu diido bixiyaha adeega; ama
- Haddii loo guuriyo deegaan kale, midkaas oo aan ahayn mid uu qofku doortay; ama
- Diidista Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) uu diido in uu u hoggaansamo codsiga ah in aanan oggysiisyo loo dirin qof kale; ama
- Ka saarid lagaa saaro barnaamijka ka-tanaasulidda; ama
- Diidista codsiga lagu helayo adeegyada ICF/IID bedelkii adeegyada ka-tanaasulidda; ama
- Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) in uu go'aansado in adeegaha lagu helo ka-tanaasulidda hadda ahi ay kasoo baxsayo baahooyinka caafimaadka iyo daryeelka oona qofku diidan yahay; ama
- Qof qiimeyn loogu sameeyay in uusan u baahnayn heerka daryeelka ICF/IID; ama
- Qof qiimeyn loogu sameeyay in uusan kasoo bixin u qalmida CIIBS.



### Gobolka 1

Degmooyinka: Chelan, Douglas, Ferry, Grant, Lincoln, Okanogan, Pend Orielle, Spokane, Stevens  
Taleefoon Lacag La'aan ah: 1-800-319-7116  
li-maylka: R1ServiceRequestA@dshs.wa.gov

### Gobolka 1

Degmooyinka: Adams, Asotin, Benton, Columbia, Franklin, Garfield, Kittitas, Klickitat, Walla Walla, Whitman, Yakima  
Taleefoon Lacag La'aan ah: 1-866-715-3646  
li-maylka: R1ServiceRequestB@dshs.wa.gov

### Gobolka 2

Degmooyinka: Island, San Juan, Skagit, Snohomish, Whatcom  
Taleefoon Lacag La'aan ah: 1-800-567-5582  
li-maylka: R2ServiceRequestA@dshs.wa.gov

### Gobolka 2

Degmada: King  
Taleefoon Lacag La'aan ah: 1-800-974-4428  
li-maylka: R2ServiceRequestB@dshs.wa.gov

### Gobolka 3

Degmooyinka: Kitsap, Pierce  
Taleefoon Lacag La'aan ah: 1-800-735-6740  
li-maylka: R3ServiceRequestA@dshs.wa.gov

### Gobolka 3

Degmooyinka: Clallam, Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Jefferson, Lewis, Mason, Pacific, Skamania, Thurston, Wahkiakum  
Taleefoon Lacag La'aan ah: 1-888-707-1202  
li-maylka: R3ServiceRequestB@dshs.wa.gov

Dadka qabba maqal waayid ama naafonimo hadalka ah waxay wici karaan Adeega Xoojinta Xiriirka Washington ayaga oo garaca 7-1 ama 1-800-833-6388 (TTY)

Haddii aad rabto macluumaad dheeri ah, booqo bogga internet-ka Maamulka Naafonimada Koriinka (DDA) oo ah:

**[www.dshs.wa.gov/dda](http://www.dshs.wa.gov/dda)**



DSHS 22-605 SM (Rev. 11/20) Somali

# Adeegaha Katanaasulida Kusalaysan Bulshada iyo Guriga

Ka socota Maamulka Naafonimada Koriinka



## Dulmarka Ka-tanaasulidda

Maamulka Naafonimada Koriinka ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ayaa wuxuu leeyahay shan barnaamijyo Ka-tanaasulid Medicaid oo ah Adeeg Ku salaysan-Guriga iyo Bulshada Ka-tanaasul kasta wuxuu bixiyaa adeego gaar ah si looga soo baxo baahooiyinka ammaanka iyo caafimaadka gudaha bulshada ah. Ka-tanaasul kasta wuxuu bixiyaa adeego kala duwan marka aan lagu helin tooska illooyin dhaqaale oo kale (ceymiska khaaska ah, Medicaid, iskuul, iwm.)

**Adeegyada Shakhsiga iyo Qoyska** waxay taageeraan shakhsiyadka u baahan adeegyada ka-tanaasulidda si ay ugu negaadaan guriga qoyska. *Da'da Dhalashada+*

**Aasaasiga Dheeraadka ah** waxaa lagu taageeraa dadka u baahan adeegaha ka-tanaasulidda si ay uga soo baxaan baahooiyinkooda caafimaad iyo daryeel ee lagu qiiimeeyah gudaha bulshada. Adeegaha waxaa lagu bixiyaa gurigooda, guriga qoyska, iyo guriga qoyska ama xarunta deegaanka qofka weyn. *Da'da Dhalashada+*

**Ka-tanaasulidda aasaasiga** waxay bixinaysaa doorashooyin deganaansho loogu taogalay dadka kusugan khatar deg-deg ah oo meelayn hay'adeed ah ama kuwa qabba baahi caafimaad iyo nolol wanaag la aqoonsaday ee loogu talogalay adeegaha aan looga soo bixi karin dhinaca Ka-tanaasulidda Aasaasiga ee Dheeraadka ah. *Da'da Dhalashada+*

**Taageerada Dhaqanka Gudaha-guriga ah ee Xoojinta Carruurta** waxay taageeraysaa dhallinyarada ku sugar khatar meelaynta guriga dibaddiisa oo sabab u ah dhaqamada dhibaatada leh. Habka CIIBS wuxuu kulug leeyahay u qorsheynta iyo taageerada dhaqanka wanaagsan ee qoyska-kusaabsan. *Da'da 8-20*

**Ilaalinta Bulshada** ka-tanaasulidda waxay bixinaysaa daaweyn, taageero deganaansho oo loogu talogalay shakhsiyadka u baahan kormeeka shaqale goobta ah 24-saacadood, si loo hubsado ammaanka dadka kale. Ka-qayb-galayaashu waxay si iskooda ah u ogol yihiiin in ay raacaan heerarka ilaalinta bulshada. *Da'da 18+*



## Adeegyada Ka-tanaasulidda

Isticmaal buug-yarahan si aad u qorshaysatid qiimeyeenta sannadlaho ah. Maareeyaha kheyraadka kiiska wuxuu sharxi doonnoaa adeegyada iyo adeegyada dokumentiga ee lagu doortay gudaha qorshaha Adeegga uu qofka-xuddunta u yahay. Adeegyada qaarkood waxay u baahan yihiin oggolaansho iyo dib-u-eegis hore. Weydi Maamulaha Kheyraadka Kiiska (CRM) macluumaadka loogu baahan yahay oggolaanshaha hore. **Adeegaha ah afar qaybood kuwaas oo leh xad da' iyo ka-tanaasulid ayaa waxaa ka mid ah:**

- **Adeegaha bulshada** – waxay kor u qaadaan ka qaybgalka macamiilkil iyo dhexgalka bulshada
- **Adeegaha xirfadeed** – adeegaha taakulada laga bixiyo dhinaca xirfadlayaal qandaraas lala galo
- **Adeegaha daryeel-bixinta** – taakulooyin la siiyo ka qayb alayaasha iyo daryeel bixiyayaasha
- **Alaab iyo adeegyo** – qalab, alaab iyo adeegyo khaas ah oo la siiyo ka qayb-galayaasha

## Adeegyada Bulshada

- **Ka-qaybgalka bulshada** – adeegyada kor loogu qaadayo xiriirada iyo ka-qaybgalka taakulooyinka bulshada. *IFS, Aasaasiga Dheeraadka ah, Aasaasiga ah*
- **Ka mid noqoshada bulshada** – adeegyo taakulayn gaar ah kuwaas oo isku xiraya dadka bulshada degaanka si ay ula samaystaan xiriirad dadka kale ee ay danaha wadaagaan. *Aasaasiga Dheeraadka ah, Keliya ka-tanaasulidda Aasaasiga ah*
- **Korjoogteynta kuwa ay isku-faca yihiin** – adeegsiga waayo-aragnimo shakhsiyeed si loo bixiyo taakulo iyo haggid. *Keliya katanaasulida IFS*
- **Fududeynta qorshaha uu qofka-xuddunta u yahay** – hawl qorshe-nololeed ah midaas oo kor loogu qaadayo go'aanka-qofka looguna samaynayo qorshe hawleed. *Keliya katanaasulida IFS*

□ **Baxnaanis deegaan** – caawimaad lagu barto, lagu horumariyo, ama haysto xirfadaha laqabsashada iyo bulshada lagama maarmaanka ah ee loogu talogalay kunoolaanshaha gudaha bulshada. *Aasaasiga ah, keliya Ka-tanaasulidda CP*

□ **Shaqo la taakuleeyay** – taakulo kooxo iyo qof, oo joogto ah si loo helo loona sii wado shaqada. *Aasaasiga Dheeraadka ah, Aasaasiga, keliya ka-tanaasulidda CP.21+*

□ **Gaadiid** – Magdhow lasiyo bixiyaha gaadiidka aan ahaynimid caafimaad ee loogu baahanyahay in lagu helo adeegaha ka-tanaasulka lagu xadiday gudaha qorshaha adeega PCSP.

## Adeegyada Xirfadeed

- **Adeegyada xasilinta** – adeegyo lagu caawinayo laguna taageerayo qofka marka uu la kulmo dhibaato caafimaadka hab-dhaqanka ah. Waxaa ka mid ah baxnaanin gaar ah, wadatashiga qoyska/shaqaalaha iyo sariirta leexinta dhibaatada.
- **Daaweyn muusik** – waxqabadyo muusik oo kor loogu qaadayo horumarka yoolalka shakhsiyeed. *Keliya CIIBS*
- **Daaweyn fardaha la xiriirta** – waxqabadyo muusik oo kor loogu qaadayo horumarka yoolalka shakhsiyeed. *Keliya CIIBS*
- **Taakulada hab dhaqanka wanaagsan iyo latalinta** – taakulooyin lagu qiiimeeyo laguna sheego baahooiyinka caafimaadka hab dhaqanka. Kuwan waxaa ka mid ah waxqabadyada kor loogu qaado hab-dhaqannada lagu sii wanaajinayo tayada nolosha iyo u-dhammaanshaha bulshada. *0-20 marka laga reebu CP 18+*
- **Qiimeyeenta dhibaatada** – qiimeyeen rabsho, daba gelid, rabsho galmo, ama hab dhaqan weerarid ah si loo xadido baahida loogu talogalay adeegaha daaweynta ama caafimaadka, nafsaaniga ah.
- **Wada-tashiga qoyska/shaqaalaha** – tababar xirfadeed iyo la-talinta qoyska iyo adeeg bixiyayaasha tooska ah si loo sii wanaajiyoo in laga soo baxo baahiyada shakhs. *La-talin ayaa la heli karaa oo ku saabsan IFS, Aasaasiga Dheeraadka ah, keliya CIIBS*
- **Waalidnimada la caawiyay** – adeegaha waxaa kamid ah wax barid, tababarid waalid, iyo xeelado kale oo la taakuleeyay. *Keliya IFS*
- **Daaweyn** – adeegyo dhagaysi iyo luuqad, jireed iyo hadal, shaqo ka baxsan kuwa laga bixiyo dhinaca Caawimaadka caafimaadka (Medicaid) (Apple Health). *IFS, Aasaasiga Dheeraadka ah, Aasaasiga, keliya CP.21+*

## Adeegyada Daryeel-bixinta

□ **Nasasho** – nasasho muddo-gaabaa ah oo ay helaan dadka la nool oona daryeela dadka naafada ah. *IFS, Aasaasiga Dheeraadka ah, Aasaasiga, keliya CIIBS*

□ **Kalkaalin xirfadaysan** – adeego kalkaalin, muddo-dheer, cudur daba dhereraada kuwaas oo lagu fulinayo baahooiyinka aanan lagu sheegin tooska Caawimaada caafimaadka (Medicaid) (Apple Care). *IFS, Aasaasiga Dheeraadka ah, Aasaasiga, keliya CP.21+*

## Alaabta iyo adeegyada

□ **Tiknaloojiyada caawimaada leh** – waxyabaha iyo tababarka loo isticmaalo in lagu horumariyo ama lagu sii wado awoodaha shaqada qofka. *IFS, keliya CIIBS*

□ **Baabi'inta cayayaanka sariirta gala** – daaweyn lagu daaweyno cayayaanka sariirta gala ee guriga. *Aasaasiga Dheeraadka ah, Aasaasiga, keliya CP*

□ **La-qabsashada deegaanka** – hagaajin muuqaal oo lagu sameeyo waxyabaha guriga lagama maarmaanka u ah ee khuseysa qofka kusii noolaanaya gudaha bulshada.

□ **Dhar khas ah** – Dhar aan-xannibaad lahayn kuwaas oo loo sameeyay si waafaqsan baahida naafada. *IFS, keliya CIIBS*

□ **Qalab iyo alaab daaweyn khaas ah** – qalabka iyo alaabta loo baahan yahay ee aan lagu helin hoosta Caawimaada caafimaadka (Medicaid) (Apple Care) ay kamid tahay qalabka iyo alaabta loo baahan yahay si loo fuliyo qorshaha taakulada hab dhaqanka wanaagsan ama daaweynta.

□ **La-qabsashada daaweynta ah** – wax-ka-beddelka deegaanka guriga si loo yareeyo ama meesha looga saaro walbahaarka. *IFS, Aasaasiga Dheeraadka ah, keliya CIIBS*

□ **Haggaajinta baabuurka** – samaynta baabuur daboolaya baahiyada qofka taageerayana isdhexgalka bulshada. *IFS, keliya CIIBS*

□ **Waxbarashada fayoqabka** – warqad waxbarasho qoran qofeed, bileed, midaas oo loogu talogalay in lagu caawiyo maamulida arimaha xiriirk-a-leh caafimaadka iyo gaarida ujeeddooyinka fayoqabka *IFS, Aasaasiga Dheeraadka ah, keliya Aasaasiga*